

Ku soo dhawoow Evolve

Evolve Neighbourhood Regeneration (Dib-u-dhalinta Xaafadda ee Evolve) waa hay'ad taagerto jaaliyadda oo si iskaashato ah la shaqeyso Queens, Bedford, Worcester iyo xaafadda Hawthorne ee Bootle. Doorkeena waa inaan isku keenno ururo baxaad badan leh oo si iskaashato ah la shaqeyo deganaha iyo ganacsiyada xaafadda ayadoo ujeeddadooda tahay in ay horumariyaan tayada noolasha ee qof walba ee aaga ku nool.

Bartamaha Evolve waxaa ku jiro dadka xaafadda degan – ujeeddadeena waa inaan dadka siinno cod iyo hab ay ku qaalqaliyaan go'aamada qaabiyo mustaqbalka meesha ay ku nool yihiin. Waxuu qasdigeena yahay inaan ayidaadno xushmayn iyo sharafta dadka iyo aggaba.

Waxaan xallinaa mawduucyo sida bey'edda (ku haynta aaga si nadiif iyo cagaar ah); tacliinta (sinta dad ka socda da' walba fursadaha waxbarashada iyo horumarka); caafimaad (bixinta talo camali ah iyo naseexo ku saabsan sidii caafimaad-qab loo noqdo); shaqada (inaan abuurno fursadaha shaqo helidda ee dadka degaanka ah iyo la shaqeyno lamaano sidii loo dhiirri-geliyo maal-gelin iyo shaqo abuurid); guryo fiican (bixino guryo tayo leh ee la kiraysan karo, iibsano karo, iyo si wadajir ah loo lahaan karo); iyo nabadda jaaliyadda (qorsheyaal baaxad badan leh sida bixinta talada nabadda guriga iyo macaamilka mawduucyada waa-wayn ee asluubta lidka ku ah bulshada iyo ka cabsida dembiga).

Waxaan halkaan u joogna inaan dhegaysano, talo iyo taageer sinno jaaliyadda iyo waxaan daacad u nahay inaan Bootle qof walba uga dhigno mid ka sii fiican.

Haddii aad jeceshahay macluumaad dheraad ah ee ku saabsan Evolve waxaad fadlan email'kan ku soo dirtaa magacaaga, lambarka telefoonkaaga iyo cinwankaaga:

[somali@evolve-nr.org.uk](mailto:somali@evolve-nr.org.uk)